

Adeegyada laga heli karo DVR Waa maxay noocyada adeegyada ee ay DVR bixiso?

DVR waxay bixisaa adeegyo kala duwan si ay ugu caawiso dadka naafada ah in ay u diyaargarobaan, helaan, iyo in ay sii haystaan shaqooyin. Adeegyada aad isticmaasho waxay ku xiran yihiin baahiyadaada shaqsi iyo duruufaha.

DVR waxay ku siin kartaa macluumaadka loo baahan yahay si ay kuugu caawiyaan go'aaminta adeegyada aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolka shaqadaada. Tusaalooyinka adeegyada waxaa ka mid ah:

Adeegyada qiimeynta Si loo cabbiro awoodahaaga, xirfadaha shaqada, iyo xiisahaaga. Adeegyadan waxay kugu caawinayaan xulashada yoolka shaqo iyo adeegyada DVR ee aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolkaas.

Adeegyada qorsheynta dheefta waxaa la heli karaa haddii aad qaadata kaashka naafonimada ama dheefo caafimaada (tusaale, SSI ama SSDI) sidaa awgeed waxaad sameyn kartaa go'aano wanaagsan oo ku saabsan yoolalkaaga xirfadda.

Adeegyada La-talinta iyo hagidda ee lagu bixiyo geeddi-socodka baxnaaninta oo dhan si laguugu caawiyo in aad gaarto go'aanno wanaagsan oo ku saabsan sida loo gaaro yoolalkaaga.

Adeegyada nololeed ee madax-bannaan si laguugu caawiyo in aad fahanto oo aad la macaamisho arrimaha naafonimada ee kaa hor istaagan in aad shaqayso; kuwani waxaa ka mid ah, balse aanan ku xaddidnayn:

- Tababarka is-daryeelidda
- Maaraynta lacagta
- Adeegsiga gaadiidka bulshada

Adeegyada tiknoolajiyadda gargaarka leh waxay kugu caawinayaan in aad meesha ka saarto caqabadaha wadhadalka iyo/ama kuwa jireed ee kaa celin kara in aad hesho oo aad sii haysato shaqada aad doonaysid. Kuwan waxaa ka mid noqon kara aaladaha gargaara maqalka, aragga, ama barnaamij kumbuyutar gaar ah. Waxaad la sahmin kartaa la-taliyahaaga sida tiknoolaiyadda ay kugu caawin karto in aad gaarto awooddaada shaqada.

Adeegyada tababarka si laguugu siiyo xirfadaha shaqo ee loogu baahan yahay si loo gaaro yoolkaaga shaqada.

Meelaynta shaqo si laguugu caawiyo in aad sii-wadato shaqo raadintaada, oo ay ka mid tahay:

- Gargaarka dhammeystiridda foomamka codsiga
- Horumarinta arjiga shaqada
- Barashada xirfadaha waraysiga, iyo aqoonsashada hoggaaminta shaqo



Hawlgalka DSHS: In La Beddelo Nolol

DSHS waa hay'ad isku-dhaf ah oo leh barnaamijyo si heersare ah waxtar u leh oo shaqeynaya iyaga oo la isaga kaashanayo saameyn gobolka oo dhan ah si caawimo loogu geysto in la beddelo nolol.

DVR, gudaha Maamulka Baxnaaninta, waxay ka shaqeysaa in ay beddesho nolol iyada oo waddo u abuuraysa isku-filnaan iyada oo loo marayo iskaashi macno leh, shaqo, fursado cusub iyo baxnaanin wax ku ool ah.

Qiimeyaal:

Daacadnimo iyo Ku-kalsoonan
Raacdada Wanaag Sare
Wadahadal Furan
Kala duwanaan iyo Ka Qaybgalin
Balanqaadyada Adeegg

Aragga:

Dadku waa kuwo caafimaadqaba
Dadku waa ku ammaan ah
Dadku waa la Taageeraa
Khayraadka Canshuur-Bixiyaha
Waa La Dhawraa

Si wadajir ah waxaan u yareynaynaa saboolnimada, waxaan wanaajinaynaa badbaadada iyo xaalka caafimaadka waxaana kordhinaynaa guusha waxbarasho iyo shaqo ee lagu taageerayo dadka iyo bulshooyinka si ay u gaaraan karaankooda suurtagalka ah.

Division of Vocational Rehabilitation
Washington State Department of Social and
Health Services
PO Box 45340 ■ Olympia, WA 98504-5340
1-800-637-5627 ama (360) 725-3636
Adeega War-Gudbinta Washington: 711

www.dshs.wa.gov/ra/division-vocational-rehabilitation

Bixinta Adeegyada DVR Tan Iyo 1933



DSHS 22-827 SM (Rev. 5/16) Somali

DADKA QABA NAAFONIMADA

Adeegso Awoodahaaga



 Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Qaybta
Baxnaaniska
Xirfada

DVR miyay sax kuu tahay?

Waa maxay DVR?

DVR waa khayraad gobolka oo dhan ah ee loogu talagalay dadka naafada ah. Waxaanu ku caawinaa shaqsiyaadka naafada ah in ay helaan oo ayna sii haystaan shaqo. DVR waa barnaamij ay gobolka iyo dowladda dhexe ay taabogaliyaan. DVR waxay shaqeyso iyada oo kaashanaysa bulshada iyo ganacsiyada si ay u sameeyaan fursado shaqo oo loogu talagalay dadka naafada ah.

Kumaa ayay DVR u adeegtaa?

DVR waxaa laga yaabaa in ay kuu adeegto haddii adiga:

1. Aad leedahay naafonimo jireed, dhimir, ama dareen ee kugu adkeynaysa in aad shaqo hesho ama aad siihaysato shaqo u dhiganta xirfadahaaga, awoodaada, iyo xiisahaaga; iyo
2. Aad u baahan tahay adeegyo iyo taageero, sida la talin, tababar, ama gargaarka shaqo raadin, si aad u hesho ama aad u sii joogto shaqo; iyo
3. Aad awoodo in aad shaqeyso iyada oo sabab u ah in aad helayso Adeegyada DVR.

Sidee ayay DVR igu caawin kartaa in aan shaqo tago?

Shaqaalaha DVR waxay kugu caawinayaan in aad hesho macluumaadka aad u baahan tahay si aad u gaarto go'aan wanaagsan oo ku saabsan:

- Nooca shaqada ee aad doonayso
- Tallaabooyinka loo baahan yahay si aad u gaarto yoolkaaga shaqo

Adigoo ka helaya taageero DVR, waxaad:

- Qaabaynaysaa oo aad sameynaysaa qorshe tallaabo-tallaabo ah si aad u gaarto yoolalkaaga shaqo.

Geeddi-socodka Baxnaaninta

1 Codsii

- DVR waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada baxnaaninta xirfadda.
- Waa in aad ka dhammeystirto Codsii DVR ka hor inta adeegyada aysan bilaaban.
- Codsigaaga waxaa dib-u eegis ku sameynaya la-taliyaha DVR si loo go'aamiyo haddi aad u-qalanto adeegyada DVR.

2 U-qalmitaanka

Waxaad u-qalantaa adeegyada DVR haddii aad:

- Leedahay naafonimo jireed, dhimir, ama dareen ee sababeysa caqabad la taaban karo ee shaqada; iyo
- U baahan tahay adeegyo baxnaanin xirfad si aad u hesho ama aad u sii joogto shaqo; iyo
- Aaad awooddo in aad shaqeyso iyada oo sabab u ah qaadashada Adeegyada DVR.

Kooxdaada la-talinta DVR waxay ururinaysaa diiwaanada si ay u diiwaangeliso aqoonsigaaga, naafonimadaada, iyo xaalkaaga shaqada. Haddii aysan jirn wax diiwaano ah oo ku saabsan naafonimadaada, waxaad u baahan kartaa in aad dhammeystirto baaritaano caafimaad ama baaritaano si aad u xaqiijiso ama u u taageerto naafonimada.

3 Qiimayn Xirfadeed

Adiga iyo la-taliyaha DVR waxaad sahminaysaa noocyada shaqooyinka ee sida ugu fiican ugu dhigma waxyaabaha aad xiisayso iyo awoodaha. Waxaad dib-u eegis k u sameynaysaa:

- Awoodahaaga, kartidaada iyo danayntaada;
- Taariikhdaada shaqo iyo xirfadaha;
- Macluumaadka ku saabsan isbeddelada suuqa shaqada degaanka.

Ama waxaad dhammeystiri doontaa:

- Imtixaanada lagu oggaado awoodda qofka iyo/xiisaynta; ama
- Isku dayada shaqo.
- Haddii aad u baahan tahay waqti badan si aad u sahmisu ikhtiyaaradaada shaqada, wayddii la-taliyahaaga DVR in uu dheereyo muddada waqtiga ee aad ku horumarinayso qorshahaaga shaqada.

4 Qorshaha loogu talagalay Shaqada

La-taliyaha DVR wuxuu bixiyaa la-talin socota, hagid, iyo taageero inta aad ka helayso ama aad ka sii-wadanayso shaqo, tani waxaa ka mid noqon kara:

- Xulashada yool shaqo;
- Qor qorshe muujinaya tallaabooyinka iyo adeegyada aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolkaaga shaqo; iyo
- Bilaabidda in aad ka shaqeyso waxqabadyada lagu muujiyay qorshahaaga ee ka mid noqon kara:

- Tababar ama waxbarasho
- Qabashada shaqo raadin
- Raadinta khayraad iyo u gudbino la xiriira shaqo
- Tababar shaqo raadin
- Farsamooyinka arjiga shaqada iyo wareysiga
- Gargaarka meelaynta shaqada
- Taageerada shaqo sii joogidda

5 Si Guul Leh U Shaqeyta

- Kadib marka aad hesho shaqo, DVR waxay jooqteynaysaa xiriirka ay kula leedahay ugu yaraan 90 maalmood si ay u habsato in shaqada ay tahay mid wanaagsan oo kuu dhiganta.
- Kadib 90 maalmood, haddii aad ku wanaagsan tahay shaqada oona loo baahnayn adeegyo kale, adiga iyo la-taliyaha DVR waxaad go'aaminaysiin marka la xirayo kiiskaaga.

6 Ka Hor Shaqada

- Haddii aad u baahan tahay gargaar kadib marka kiiskaaga la xiso sida qof si guul leh loo shaqaaleeyay, DVR waxay dib-u furi kartaa kiiska waxayna ku siin kartaa gargaar si ay kaaga caawiso in aad sii joogto shaqadaada, ama in ay kugu caawiso in aad dib-u codsato adeegyada DVR.
- Haddii shaqo la lumiyo, DVR waxay kugu caawin kartaa in ay kuu hesho shaqo la mid ah.